


# South Delridge

## Qorshaynta Bulshada



## Ku saabsan Mashruucan

Waxay ku taal West Seattle, bulshada South Delridge waxay ka kooban tahay xaafado badan, sida Roxhill, Westwood, iyo Highland Park. South Delridge waa bulsho dhaqamo kala duwan leh oo leh goobo ganacsi oo u adeega West Seattle iyo White center.

Xubnaha bulshada ee aagga ayaa ugu danbeyn dhamaystiray aragtii iyo siyaasado la socda si ay gacan uga geystaan qaabaynta kobaca iyo maalgashiga xaafadooda in ka badan 20 sano ka hor. Sannado badan, xubnaha bulshadu waxay muujiyeen rabitaan ah inay cusbooneysiyaan aragtidooda.

Habka qorsheynta Bulshada waxaa ka mid ah Westwood-Highland Park Urban Village, iyo agagaarka South Delridge meelaha ay dadku isugu yimaadaan, wax ka iibsadaan, raadsadaan, iyo dib u abuuraan, kuwaas oo muhiim u ah bulshooyinka ku nool aagga qorsheynta. Meesha qorshaynta saxda ah ayaa lagu go'aaminayaay iyada oo loo marayo habka hawlgelinta bilowga ah.

## Maxaa Dhacay Hadda?

Xafiiska Qorshaynta iyo Horumarinta Bulshada ee Magaalada Seattle (OPCD) wuxuu ka shaqaynayaay horumarinta iskaashiga ururada bulshada iyo waaxyaha Magaalada si kor loogu qaado codka bulshada, oo lagu xidho waaxyaha Magaalada kuwaas oo iska kaashan doona mashruucan.

## Natiijada

Mashruucani waxa uu abuuri doona aragtii bulsho iyo magaalo oo la wadaago iyo qorshe hawleed dhisa hantida bulshada iyo awooda, isla markaana isku toosiya maalgashiga Magaalada si loo gaadho hiigsigan.

## Ka Qayb Gal

Xubnaha bulshadu waxay ka qayb qaadan doonaan tallaabo kasta oo lagu qeexayo mashruuca, horumarinta aragtii, aqoonsashada xeeladaha, iyo qaadista tallaabo.

Dhawrka bilood ee soo socda, OPCD waxay ka qayb qaadan doontaa munaasabadaha bulshada iyo martigelinta isu imaatinka xubnaha bulshada si ay u bixiyaan taladooda.

Asalkii hore

Gu'ga 2022


La wadaag,  
Baro & Aragtida  
Xagaaga- Dayta

Baadh Fikradaha  
& Keeladaha  
TBD

Dhamaystirka  
Qorshaha  
TBD

Fulin  
TBD





Proposed South Delridge Planning Area (boundary to be determined by community)

North Delridge Planning Area (Action Plan completed in 2018)

Delridge Station Transit Service Area (1/4-mi walk from bus stops)

Commercial areas (zoned for commercial/mix-use)

## Qorshaha Waxqabadka South Delridge

OPCD waxay la xiriiri doontaa xubnaha bulshada si ay u abuurto aragti la wadaago iyo qorshe hawleed dhisa awooddha bulshada si loo helo horumar loo siman yahay, lana waafajiyoo maalgashiga Magaalada si loo gaaro hiigsigan ([bit.ly/SouthDelridgeActionPlan](https://bit.ly/SouthDelridgeActionPlan)).

## Qorshaha Waxqabadka North Delridge

OPCD waxay dhamaystiray habka Qorshaynta Bulshada 2018 kii waxayna daaba cday Qorshaha Waxqabadka North Delridge. Dukumeentigu wuxuu qeexaya lix meelood oo mudnaanta leh: ([bit.ly/NorthDelridgeActionPlan](https://bit.ly/NorthDelridgeActionPlan))

1. Taageerida Bulshooyinka Kala Duwan & Hawlgelinta
2. Horumarinta Goobaha Xaafadaha firfircoo
3. Hagaajinta Helitaanka Cunto La awoodi karo, Caafimaad qabta
4. Aburitaanka Dookhyada Gaadiidka Firfircoo
5. Kobicinta Biyo-biyyoodka Longfellow Creek Healthy
6. Ka faal'iidayisiga Beeraha & Xarumaha Dhaqanka si loo taageero Bulsho Caafimaad qabta

## Dadaal La Isku kaashaday

Waaxyaha magaaladu waxay iska kaashan doonaan mashaariic badan si ay u ururiyaan ra'yicelintaada oo ay u hubiyaan in natiijooyinka mashaariicdani ay wax ka qabtaan baahiyaha bulshada iyo mudnaanta lagu tilmaamay qorshe hawleedka North Delridge iyo South Delridge.

### West Seattle iyo Ballard Link Extensions (WSBLE)

#### Qorshaynta Aagga Saldhigga Delridge ([Seattle.gov/lightrail](https://Seattle.gov/lightrail))

Goobta saldhigga waxaa la dooran doonaa 2023, waxaana la qorsheeyay in la furo 2032. Si ka duwan Aagga Saldhigga caadiga ah ee u dhigma socod 10-daqiqo ah laga soo bilaabo joogsiga, aagga saldhigga Delridge wuxuu noqon doonaa shaxda marinka laga galo labada waddo ee baska ee joogtada ah.

### Horumarka Ku Wajahan Gaadiidka Sinaanta leh

(Equitable Transit Oriented Development, ETOD)

OPCD waxay taageertaa habka bulshada Madow, Asaliga ah, Dadka Midabka ah si ay u qorsheeyaan waxa horumarka aan barakaca lahayn uu u eekaan karo agagaarka Delridge iyo saldhiggya tareenka fudud. Habkani waxa uu xarun u yahay dhismaha awoda bulshada, tahaanshaha dhulka beesha, guryo la awoodi karo iyo faal'iidooyinka kale ee bulshada, habab badbaado leh oo hufan oo loo maro, deegaan caafimaad qaba, iyo hubinta in faal'iidooyinka dhaqaale ay u yimaadaan xubnaha bulshada.

### Deeqaha NEA - Meelaynta Hal-aburka leh ee WSBLE

Waaxda Xaafadaha (DON) waxa ay ka qaybqaadanaysaa mashruuca deeqda fanka ee National Endowment for the Arts (NEA) si ay u maalgaliso ka qayb qaadashada ay hogaminayaan dhalinyyaradu meelaynta hal aburka ee West Seattle iyo Ballard Link Extensions (WSBLE). DNDA waa lammaanaha bulshada.

### Adeegyada Dadweynaha Seattle (SPU)

#### Mashaariicda Longfellow Creek

- Nidaamaya Biyo-mareenka Dabiiciga ah ee Longfellow ([bit.ly/LongfellowNDS](https://bit.ly/LongfellowNDS))
- Longfellow wuxuu ka bilaabmaa halkan: hagaajin nidaamka bullaacadaha ([bit.ly/LongfellowSH](https://bit.ly/LongfellowSH))

### Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT)

#### Mashaariicda Gaadiidka

Dib Ilgu Xiranka West Seattle ([bit.ly/ReconnectWS](https://bit.ly/ReconnectWS)), RapidRide H Line ([bit.ly/RapidRideH](https://bit.ly/RapidRideH)), Qorshaha Gaadiidka Seattle ([bit.ly/SeaTranspPlan](https://bit.ly/SeaTranspPlan))



**David W. Goldberg**

Xafiiska Qorshaynta & Horumarinta Bulshada (OPCD)  
[davidw.goldberg@seattle.gov](mailto:davidw.goldberg@seattle.gov)



## Nala soo xiriir

Fadlan iimayl noogu soo dir su'aalo, ama lagugu daro liiskeena boostada. Marka aad nala soo xidhiidho, fadlan noo soo sheeg haddii aad u baahan tahay turjumaan.